Soomaaliya waxa ay ku jirtaa dhacdo gaar ah afar iyo toban sano oo isku xiga. Mudada warbixinta Dowlada Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) waxa ay gacanta ku heysay magaalo madaxdeeda Muqdisho. Dowlad goboleedyaduna waxa ay gacanta ku sii hayeen sida badan caasimdaha maxaliga ah dalka oo dhan. Jamhuuriyadda is-magacaawday ee madaxa banaan ee Somaliland iyo Dowlada leh xukun hoosaadka ee Puntland waxa ay gacanta ku sii hayeen amaanka iyo dhaqan galinta sharciga ee goboladooda. Dowlada Federaalka waxa ay ku laheyd saameyn kooban wixii ka baxsan Muqdisho; Kooxda argagaxisada ah ee al-shabaab waxa ay sii waday in ay sii heysato dhulalk miyiga ah ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya. DFS waxa ay diirada saartay dhisida awooda iyo in ay ka ilaaliso weerarda al-shabaab Muqdisho iyo xarumaha dowlada. Howlgalka Midawoga AfriKa ee Soomaaliya (AMISOM) waxa uu fulisay howlgalo ciidan 2015kii si ay ula wareegto dhulalka al-shabaab gacanta ku haysay. Si kastaba ha ahaatee, dadaaladoodii waxaa ka horyimid weeraro sii kordhay ee ciidamada amaanka lagu hayay oo uu geeystay ururka argagixisada ah. Maxkamada ciidamadu waxa ay xakuntay kiisas culus, oo ay ku jiraan kuwa la xiriiray argagixiso, waxa ayna qaaday kiisas badan oo madani ah. Dowladu waxa ay laheyd awoow yar oo ay wax uga qabato sida badan dambiyada, oo ay ku jiraan tahriibinta dadka,sidaa awgeedna waxa ay soo saartay dadaal yar oo dacwo ku soo oogis, ilaalin, iyo ka hortagid dhamaan gobolada. Saraakiisha soomaalidu sidoo kale waxa ka maqnaa fahamka dambiga tahriibinta, kaasoo ay sida badan ay la meel dhigaan soo galintaanka shari darada ah muhaajiriinta.

Heerka iyo Baaxada

Soomaliya waa dal u ah il, loo sii maro iyo la'aado rag, haween iyo caruur loogeeystay ku shaqeysi khasab ah , tahriibin galmo. Wararka ku saabsan tahriibinta ee gudaha Soomaaliya waa mid aad u adag in la helo ama la cadeeyo. Waxaa dhibanayaasha ka soo guuraan koofurta Soomaaliya iyo gobolada dhexe iyaga oo u socda Puntland iyo Somaliland oo ee waqooyig. Somaliland haweenka ayaa ah kuwo soo qora iyo dulaal si loo sii geeyo dhibanaayaasha meelo fog , una sii diraya Puntland, Djibouti, iyo Ethiopia oo guryaha lagu adoonsado ama loo tahriibiyo galma ahaan. Kooxo dambiilayaal ah oo horay ugu jiray burcad badeednimo ayaa la soo sheegay in ay sii wateen ka faa'iideysiga haween iyo gabdho Soomaliyeed in ay guryaha ka adeegaan ama adoonsi galmo. Dadka Soomaalida ah ee qowmiyadaha Baantuuga iyo Midgaanta ka soo jeeda ayaa ah kuwo la yaso waxaana mararka qaar u heeystaa adoonimo xubnaha qabiilada kale ee ka awooda badan si ay uga shaqeeyaan guryaha , shaqaalaha beeraha iyo xoolo jir. Faqriga dartiis iyo awood la'aanta in la siiyo daryeel dhamaan xubnaha qoyska, qaar Soomaalida ka mid ah ayaa ogol in ay ku wareejiyaan heynta ilmahooda dad ay la wadaagaan xiriir qoys iyo isku xirnaan qabiil; qaar ka md ah caruurtaa ayaa laga yaabaa in ay noqdaan dhibanayaal xoog loogu shaqeysto ama tahriibin xagga galamada ah. Iyada oo caruur badan ay ka shaqeeyaan gudaha guryahooda ama meherdaha qoyska, waxaa laga yaabaa in qaar caruurta ka mid ah lagu qasbo shaqooyinka beeraha , howlaha guriga, ilaalinta xoolaha, iibinta iyp xamaalida jaadka, jajabinta dhagxaha, ama howlaha dhismada. 2014 kii , NGO caalami ah ayaa waxa uu sii daayay warbixin diiwaan galisay kiisas tacadi galmo , iyo ka faa'iideysiga gabdhi iyo haween Soomaaliyeed oo ay ku jirto in la iibiyo oo ay geeysteen shaqaalaha Ugaandha iyo Burundi ee Amisom. Baaritaan ay Midawga Afrika ku sameeyeen eedaymaha ayaa lagu soo gabagabeeyay in ay jirtay cadeyn ka faa'iideysi galmo iyo tacadiyo ee ygeeysteen shaqaalaha AMISOM.

Daka ku barakacay guduhu waxa ay sii ahaayeen kuwo u nugul iyo in loo safriyo ku shaqeeysi. Waxaa la soo wariyay in Ilaalada gacanta ku haya qaar ka mid ah xeryaha dadka ku soo barakacay gudaha , in mararka qaar lagu eedeeyo iyaga oo gacan saar la leh saraakiil Soomaali in ay ku qasbaan gabdhaha iyo haweenku in ay u galmoodaan iyaga oo ugu badalanaya raashin iyo adeegyo kale oo ka jira xeryaha dhexdooda. Waxa ay sii wadeen in ay ku soo dalacaan ijaar iyo kharashyo ay uga badashaan adeegyo kale oo asaasi ah oo bilaash ah iyo in ay ka iibiyaan qeybaha ay gacanta ku hayaan ee xeryaha “ilaalo” kale iyaga oo abuuraya meerto deyn ah oo ay galaan barakacayaasu taas oo ka dhigta in ay u nuglaadaan adoonsi la iska dhaxlo. Kuwa tahriibinta iyo kuwa kotorobaanka ku shaqeeysta ayaa la soo wariyay in ay ka faa’iideystaan barakacayaasha haweenka iyo caruurta ah ee nugul sida badan kuwa ka yimaada koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, iyaga oo mararka qaar isticmaalaya balanqaadyo been ah in ee shaqooyin macaash badan leh ooy ka helayaan Yurub iyo Waqooyiga America.

Sida laga soo xigtay ururada caalamiga ah , mudada warbixinta Somaliland iyo Puntland waxaa soo gaaray qulqul muhaajiriin ah oo lagu qiyaasay 30,000 oo isugu jara qaxooti, muhaajiriin iyo muwaadiniin Soomaali ah oo ka soo cararayay iska horimaadyada ka jiray gudaha Yementa oo dagaalku buurbiriyay. Inkasta oo tirakoob lagu kalsoonaan karo uusan jirin, muhaajiriinta dhaqaale doonka ah ee Itoobiya , oo sida badan ka yimaada gobolka Oromada ee itoobiya ayaa ahaa kuwo sii marayay Soomaaliya iyaga oo u sii jeeda Liibiya, Sudan iyo Yurub mudada warbixinta. Haweenka iyo gabdhaha muhaajiriinta ah ee ka shaqeeya dhaqaalaha aan rasmiga aheyn ayaa ahaa kuwo aad ugu nugul tahriibinta khasabka ah.

Kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay kaxeeyaan haweenka Soomaalida, iyagga oo mararka qaar sii marsiinya Jabuuti, una sii jeeda bariga dhexe, halkaas oo ay si joogta ah ugu mutaan adoonsi guryaha ah ama iyaga oo lagu qasbo dhileysi. Raga Soomaalidu waxa ay la kulmaan xaalado xoog loogu shaqeysto sida qowsaarnimo iyaga oo ka shaqeeya dowladaha Khaliijka. Kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay caruurta u qaadaan Sacuudi Carabiya iyaga oo ku khasba in ay ka tuugsadaan dariiqyada. Hayado shaqo bixineed oo shaki ku jiro ayaa fududeeya tahriibinta dadka iyaga oo xulanaya dadka xiiseeynaya in ay u haajiraan wadamada khaliijka ama Yurub si ay uga shaqeeystaan.

Saraakiil ka tirsan dowlad federaalka ayaa lagu edeeyay in ay ka iibiiyaan dulaaliinta safarka iyo kuwa khasabka wax tahriibiya dukumeenyida lagu safro oo been abuur ah. NGOyda iyo ururo caalami ah ayaa soo sheega in Soomaalidu ay si soo kordheeysa ay u raadiyaan in ay u guuraan meelo kale oo Afrika ah, oo ay ku jiraan Kenya iyo Koofurta Afrika. Masuuliyiinta Somaliland ayaa soo wariyay kororka safrinta ama afduubka caruurta iyo kuwa ka soo qalinjabiyay jaamacadaha ee shaqo la’aanta ah, kuwaas oo dabadeed sii mara Itoobiya iyo Suudaan ayaa waxaa mararka qaar u heysta afduub shabakado ka jira Liibiya marka ay u sii jeedaan Yurub iyo Bariga Dhexe. Xubno ka tirsan qurbo joogta Soomaalida ayaa isticmaal balanqaadyo guur oo been ah si ay ugu soo jiitaan dhibanayaasha aan tuhunsaneeynayn, iyada oo qaar badan oo ka mid ah ay ku jiraan qaraabo, si ay u tagaan Yurub iyo Mareeykan, halkaas oo lagu khasbo dhileeysi ama adoonsi guryaha ah.

Kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la sheegay in ay marsiiyaan shaqooyin khasab ah iyo ka faa'iideysi galmo caruurta Soomaalida ah ee ka soo cararaya al-shabaab kana raadsanaya qaxootinimo gudaha Keenya. Baabuurta xamuulka ee badeecadaha u kala gudbiya Kenya ilaa Soomaaliya ayaa mararka qaar ku soo laabta Keenya iyaga oo wada gabdho iyo haween; kuwa khasabka wax ku tahriibiya ayaa la wareega gabdhahaas yar yarka ah iyo haweenkaas waxa ay u soo keexeytaan guryaha dhilooyinka ee ku yaala Mombaasa iyo Naryoobi si ay uga faa'iideystaan ama waxa ay u diraan meelo ka baxsan Kenya. Dadka Itoobiyaanka ah ee aan waraaqha wadan ee ku sugan waqooyiga Soomaaliya ayaa ayaa ah kuwo u nugul kuwa khasabka wax ku tahriibiya marka ay shaqooyin ka raadsadaan Puntland iyo Somaliland si ay u maalgaliyaan safoorkooda xiga ee Bariga Dhexe. Kuwa khasabka waxa ku tahriibiya waxa ay qarsoodi u sii marsiiyaan haweenka Itoobiyaanka ah Soomaaliya iyaga oo ku sii jeeda meelo ka mid ah Bariga Dhexe, halkaas oo ay ugu xigsato in lagu adoonsado guryaha iyo dhileysi. Caruurta Itoobiyaanka ah ayaa u safra Somaliland iyaga oo raadsanaya shaqooyinka, laakiin waxaa halkeedii lagu khasbaa in ay tuugsadaan wadooyinka. Gaar ahaan gobolada xeebta, qaar ka mid ah kuwa khasabka wax tahriibiya ayaa la soo sheegay in ay odayasha bulshada ku qasbaan in ay ku xubnaha bulshada ku qanciyaan in ay ugu safraan Yurub fursado shaqo darteed; Shaqsiyaadka qaar ayaa muta in khasab loogu shaqeeysto gudaha Yurub.

CARUURTA LA ASKAREEYO .

Intii uu sanadku socday,waxaa jiray warbixino isdaba joogay oo sheegayay Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed (XDS), Ahlu Suna Wal Jamaaca, maliishiyaadka taageersan Galmudug iyo al-shabaab ay u isticmaaleen caruur askar ahaan. 2015, DFS ayaa ku celisay in ay ka go'antahay in ay baabiso u isticmaalka caruurta askar ahaan dhamaan darajooyinka XDS, Soomaaliyana waxa ay ansixisay Axdiga Xaquuqda Caruurta. Hirgalinta qorshaha fulineed ee XDS si loo xakameeyo qorashada iyo isticmaalka caruurta askar ahaan – oo la saxiixay 2012-waxa uu ahaa mid kooban mudada warbixinta, inkasoo dowlada ferderaalku ay tilmaantay muhuumadeeda heer gobol ayna qabatay tababaro qeybo kamid ah. Intii lagu jiray howlgalo lagu kala saaray , iyadoo si isu dhow ay isugu duween shaqaalaha QM, Unuga Dhowritaanka Caruurtu waxa ay ka heleen hal cunug Xarunta Tababarka Ciidamada Xoogga ee Dhagobandan iyo 36 caruur ah oo laga aqoonsaday lagana saaray ka mid noqoshada iyo qoroshada gudaha Kismaayo, taasoo ka hor istaagatay in ay ku biiraan XDS. Masuuliyiintu waxa ay ku wareejiyeen caruurta laga soo saaray kooxaha hubeysan Sanduuqa Caruurta ee QM si loo daryeelo. QM waxa ay sii waday in ay sheegto walaaca ay ka qabto xiritaanka iyo heynta caruurta oo ay ku jiraan XDS, MKJ, Maliishiyaadka taabacsan Galmudug iyo AMISOM; qaar ka mid ah caruurta la xabisay ayaa lagu eedeeyay in ay gacansaar la lahaayeen al-shabaab. Sida badan dadka Soomaalidu ma lahan warqado dhalasho, iyada oo aan la helin qaab abaaulan oo lagu diiwaangaliyo ama hab guud oo qorasho , in la cadeeyo eedeymaha caruur askar loo qortay waxa ay sii ahaaneysaa mid adag. Waxaa taa siii raaca, warbixino aan la cadeyn oo sheegay in maleeshiyooyin ka soo hor jeeda al-shabaab ay qortaan caruur horay uga tirsanaa jiray xoogaga al-shabaab.

Dhamaan meelaha ka baxsan gacan ku heynta dowlada, al-shabaab waxa ay si joogta ah uga qorataa caruur ay u isticmaalaan maleeshiyaadkooda, caadiyan iyago oo u maraya afduud iyo marin habaabin. Kooxda argagaxisadu waxaa ay xoog uga qorteen masaajidda , dugsiyada quraanka,iyo goobaha caruurta la dayacay. Al-shabaab waxaa ay u isticmaaleen caruurta dagaal iyo howlo kale oo taageero ah koofurta

iyo bartamaha Soomaaliya, oo ay ku jirto dhigitaanka bambooyinka wadada dhinaceeda la dhigo iyo waxyaalahah kale ee qarxa, iyaga oo laga dhigto gaashaan waqtiyda ay howgalada fuliyaan, iyaga oo qaada khaarijin iyo ismiidaamin , bixiya wardoon, u adeega ilaalo ahaan iyo iyago oo ka adeega guryaha. Al-shabaab waxa ay sidoo kale khasab ku soo qorteen gabdho yar yar iyaga oo uga faa'iideystay adoonsi xagga galmada ah. QM waxa ay sheegtay in al-shabaab ay qorteen 258 caruur ah laga soo bilaabo Abriil ilaa Sebteemeber 2015.

DADAALADA DOWLADA.

Maamulada somaliland iyo Puntland waxa ay sii wadeen dadaal yar oo ay kula dagaalamayaan tahriibinta khasabka ah mudadda warbixinta. Iyada oo ay ugu wacneyd daganaansho la'aan bulsho darteed iyo ololaha daba dheeraaday ee lagu wiiqayo al-shabaab iyo in la abuuro sharci iyo kala dambeyn gudaha Soomaaliya, DFS waxaa ka maqnaa tababar ku filan, ilo iyo awood ay si wax ku ool ah dacwad ugu soo oogto kuwa khasabka wax tahriibiya, u ilaaliso dhibanayaasha, ama ay uga hortagto dambiyada. Sharcigii ciqaabta ee ka horeeyay 1991dii (oo ka dhaqan gala dowlada dhexe iyo heer gobol) waxa uu mamnuucayaa ku shaqeeysiga khasabka ah , iyo noocyada kale ee tahriibinta khasabka ah ee dadka . Qodobka 455 waxa uu mamnuucayaa uuna ciqaab ka dhigayaa adoonsinga, isaga oo saaraya ciqaab u dhaxeeysa shan ilaa 20 sano oo xarig ah. Qodobka 464 waxa uu mamnuucayaa ku shaqeysiga khasabka ah, isaga oo saaraya ciqaab u dhaxeysa lix bilood ilaa iyo shan sano oo xabsi ah. Qodobka 457 waxa uu mamnuucayaa wareejinta, u sahliada, hanashada ama heysashada qof, waxa uuna saarayaa ciqaab sadex ilaa 12 sano oo xabsi ah. Dhamaan ciqaabahaas waa kuwo adag oo ku filan. Qodobka 408(1)waxa uu mamnuucayaa in dhilaysi lagu khasabo qof iyada oo loo marayo rabshado iyo handadaad, kasoo saaraya ciqaab dhan laba ilaa lix sano oo xabsi ah, kasoo ah mid adag oo ku filan laakiin aan la ekeyn kuwa la saaray dambiyada kale ee aadka u culus , sida kufsiga. Dastuurka , oo wali ah ku meelgaar , waxa uu mamnuucayaa adoonsiga, ku shaqeeysiga,tahriibinta sharciga ah, iyo ku shaqeeysiga khasabk ah sida ku xusan qodobka 14aad. Qodobka 29(6) waxa uu mamnuucayaa in caruurta loo isticmaalo askar ahaan. Ciidanka Boliiska Soomaliyeed waxa uu ahaa mid shaqaalahu ku yar yahay,tababarkoodu hooseeyo, ayna ka maqantahay awooda iyo nidaam sharci oo haboon oo ay si wax ku ool ah ugu dhaqan galiyaan sharciga. Intii lagu jiray 2015kii, DFK ma aanay soo gudbin wax warbixin ah oo ku saabsan baaritaanka iyo dacwad ku soo oogida ee dambiyada tahriibinta khasab ah, heerka federaalka ama heer gobol, oo ay ku jiraan saraakiisha lagu soo eedeeyay in ay ka qeybqaataan fudueeynta tahriibinta galmada iyo shaqada khasabka ah.

Maamulada dowladaha Puntland iyo Somaliland waxa ay leeyihiin nadaam sharci oo shaqeeynaya, laakiin awoodooda sharci fulineed wey koobneeyd; ma aanay soo gudbin xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan baaritaanada tahriibka khasabka ah , ama dacwad ku soo oogid muda sanadka ee warbixinta. Gudaha Puntland, Wasaarada Horumarinta Haweenka iyo Arimaha Qoyska ayaa kor kala socotay dadaalada looga hortagayay tahriibinta khasabka ah iyo ciidama boliiska ee Garoowe ayaa howlgaliyay unug howlgalada dhan ka ah tahriibka khasabka ah, inkasta oo ay la'aayeen tababar haboon. Qodob hoostaga sharciga Islaamka ee Puntland ayaa dambi ka dhigaya dilka qof dhuumaaleysi lagu wada ama loo thriibinayay si khasab ah , kaas oo saaraya ciqaab u dhaxeeysa hal ilaa shan sano oo

xabsi ah. Sharciga gudaha ee Somaliland waxa uu amanuucayaa ku shaqeeysi khasab ah , adeegsi aan akhtiyaar aheny iyo adoonsi. Wasaarada Shaqadaiyo Arimaha Bulshada ee Somaliland ayaa sii waday in ay kor kala socoto dadaalada looga soo horjeed tahriibinta khasabka ah , laakiin waxa ay aheyd mid aan shaqeeyneyn mudada warbixinta.

Ma jirto hayad dowladeed oo laheyd hab rasmi ah oo lagu garto ama loo gudbiyo dhibanayaasha tahriibinta, Wararka ku saabsan dadaalka DFS ee lagu dhowrayo dhibanayaasha tahriibka khasabka ah ayaa aheyd mid kooban. Saraakiisha Somaliland waxa ka fara batay kiisaska bini'aadaminimo ee ku lugta leh qowmiyada Soomaalida, muhaajitiinta dhaqaale doonka ah, iyo muhaajiriinta sharci darada ah ee ka yimid Itoobiya, kaas oo sida badan yareeya aqoonsiga iyo dhowritaanka dhibanayaasha u muuqda in lagu tahriibinayo si khasab ah. Gudaha Puntland shaqaalaha ururada caalamiga ah ayaa sii waday in ay u tababaraan saraakiisha aqoonsiga dhibanayaasha iyo habka gudbinta. Masuuliyiinta DFS, Punland iyo Somaliland ma aanay siin adeegyo lagu badbadinayo dhibanayaasha khasabka lagu tahriibinayay iyaga oo si buuxda ugu tiirsanaa ururada caalamiga ah in ay siiyaan dhibanayaasha adeegyo dib ugu midoobid. Federaalka ama dowlada goboleedyadu midna ma siin kaalmo lacageed ama kaalmo aan lacag aheyn heyadaha kaalmeeya dhibanayaasha. Mana jirin qaabab sharci oo kale oo dhibanayaasha tahriibka ee ajaanibta ah looga saarayo Soomaaliya iyada oo lagu geynayo dalal laga yaabo in ay soo wajahdo xaalad adag iyo ciqaab; si kastaba ahaatee, saraakiisha dowladu ma aanay aqoonsan dhibnayaal ajaaniib ah intii uu sanadku socday. Masuuliyiinta Somaliland waxa ay sii wadeen in ay la shaqeeyaan ururada caalamiga ah iyo Xarunta Wax ka Qabashada Muhaajiriinta ee Hargeysa si ay ugu abuuraan bukaan socod eegto guurguurta dadka barakacayaasha ah ee ku hareereysan degaanka Maxamed Mooge iyo xarunta dhaqan celinta caruurta wadooyinka. Saraakiisha dowladu ma aysan soo gudbin wax xog ah oo ku saabsan hadii caruur looga fa'iidaystay dhileysi ama geystay dambiyo lagu galay dhulka Soomaalida laga ilaaliyay ciqaab dambiyeed sida uu qabo sharciga Soomaalidu. Intii lagu jiray sanadka warbixinta, federaalka iyo maasuuliyiinta gobaladu, iyaga oo helaya kaalmo banaanka ah , waxa ay kor kala socdeen wareejinta caruur horay u aheyd askar oo la shaqeeyay al-shabaab oo lagu wareejiyay gacanta ururo caalami ah.

Masuuliyiinta Soomaaliya oo dhan waxa ay muujiyeen dadaal yar oo ay uga hortagayaan tahriibinta intii lagu jiray sanadka. Saraakiisha Somaliland iyo Puntland waxa ay fufudeeyeen dadaal wacyi galin bulsho oo la xariiray tahriibinta khasbka ah; si kasta ha ahaatee, ololahaas goboladu waxa ay sii wadeen in ay isku xiraan tahriibinta khasabka ah iyo dhuumaaleysi ku soo galainta, waxa ayna si gaar ah xoogga u saareen muhaajiriinta dhaqaale doonka ah. DFS ma aanay qaban waxa olole wacyi galin ah mudada warbixinta.Dowlada Puntland waxa ay sameysay gudi wax ka qabta tahriibinta khasabk ah , laakiin ma uusan shaqeyn mudada warbixinta. Ma jirin hayad dowladeed oo siisay maaliyad hay'adaha kormeera shaqaalaha. Mana la qorin kormeerayaal fuliya sharciga shaqaalaha. Masuuliyiinta dalka oo dhan ma aanay sameyn dadaal la taaban karo oo lagu yareeynayo dalabka shaqaale xoog loogu shaqeeysto ama falalka ka ganacsiga galmada. Dowladu ma aanay siin tababro looga hortagayo tahriibinta shaqaalaheeda diblomaasiyiinta ah. Soomaliya qeyb kama aha Heshiiska QM 2000 ee habmaamuuska TIP.